

# *Ujeedada Korniinka iyo Eegitaanka*

<b>Maaraynta dareenka</b>	Sidee ayuu ilmahaagu u maareeyaan dareenka xoogan? Miyuu ilmahaagu qabaa baahiyoo aan la buuxin? Tusaale ahaan, ilmahaagu ma sugi karaa wakhtigiisa marka la taagan yahay farxalka si uu farxasho? Ma jirtaa khidada aad leedahay oo lagu maareynayo nidab jabka, sida in la sameeyo hawlo kala duwan hadii ciyarta uu jecel yahay aan la heli karin?
<b>Xadidaadaha iyo filashooyinka soo socda</b>	Miyuu ilmahaagu aqbali karaa jihaynta xubinta qoyska? Tusaale ahaan, hadii uu qasabada oo furan uu iskaga tagayo, miyuu xidhaa marka la xasuusiso? Miyuu ilmahaagu saadaalin karaa talaabada xigta ee hawl maalmeedka maalintii? Tusaale ahaan, ilmahaagu ma cadaydaa kahor inta aanu seexan iyada oo aan la xasuusin?
<b>Inuu baahidiisa si wanaagsan u dabaro</b>	Miyuu ilmahaagu buuxiyay waxyaabo kamid ah baahiyihiisa? Tusaale ahaan, marka uu ilmahaagu qabanayo guriga, miyuu iska saaraan koodhkiisa oo ma sudhaa, ama miyuu doortaa waxa uu ku ciyaarayo ama geemamka saaran kabadhka?
<b>La macaamilka lodkii</b>	Ilmahaagu ma bilaabay inuu ka dalbado caruurta kale inay la ciyaraan? Sidee ayuu u dalbadaan inuu ka qayb galoo waxa uu arko caruurta kale ay qabanayso? Tusaale ahaan, hadii uu arko laba caruur ah oo kubad ku ciyaarada garoonka, isaga (marka aad ka caawiso) inuu ka dalbado hadii uu la ciyarii karo, sidoo kale.
<b>Dheelitirka baahiyaha iyo xuquuqda nafta iyo dadka kale</b>	Sidee ayuu ilmahaagu u bixiyaa waxa lagu ciyaaro ee la wadaago, habaynta, ama agabka kale marka uu la ciyaarayo caruurta kale? Tusaale ahaan, inta uu garab fadhiyo walaashii, mararka qaar waxa uu la wadaagaa maarkarka oo waxa uu ka dalbadaa inay usoo celiso walaashii marka ay ku dhamaysato.
<b>Xalinta dad dhax galka</b>	Sidee ayuu ilmahaagu bilaabay inuu xalka ku sheego marka uu mushkilad la kulmo isaga oo la joogo asxaabtii ama walaaladii? Tusaale ahaan, marka isaga iyo asxaabtii ay doonayaan inay wada kaxaystaan iskuutar ay haystaan, waxay sheegaan, "waxa aan soo kaxaysan doonaa waxoogaa baaskiilka hal mar, kadibna adiga ayaa kaxaysan doona."
<b>Bandhiga xirfadaha socdaalka</b>	Sidee ayuu ilmahaagu u maamuli karaa jidhkiisa marka uu jidhkiisa ka shaqaysiinayo? Tusaale ahaan, waxa uu kor iyo hoos u lugeeyaa jaran jarada isaga oo kolba lug qadaya, koraya oo ka dhaadhacaya agabka ciyarta, ama ka dul wareegaya shay jidka ka xidhaya.
<b>Inuu soo bandhigo xirdaha dheelitirka</b>	Sidee ayuu ilmahaagu iskugu dheelitira socodka ama ciyarta? Tusaale ahaan, si wanaagsan oo dheeliran ayuu u socon karaa marka uu lugaynayo jidka agtiisa ama uu ku boodayo dhulka, oo waxa uu ku istaagaa labadiisa lugood.
<b>Isticmaalka faraha iyo gacmaha</b>	Dhaqaaq yar oo nooceee ah ayuu samayn karaa ilmahaagu marka uu isticmaalayo gacmaha, dhudhunka iyo faraha? Tusaale ahaan, waxa uu tuujin karaa biyo iyaga oo isticmaalaya agabka lagu ciyaaro, waxa uu wax ku jari karaa maqas, waxa uu walaaqi karaa wax, waxa uu wareejin karaa gacanta albabka si uu u furo, oo waxa samayn karaa dhaqaaqa gacanta ee heesaha sida "Itsy Bitsy Spider."



Washington  
Kindergarten Inventory  
of Developing Skills



Washington Office of Superintendent of  
**PUBLIC INSTRUCTION**

<b>7b Isticmaalaa agabka qoraalka iyo sawirka</b>	Sidee ayuu ilmahaagu u qabtaa qalin beensalka, qalinka ama qalinka midabka? Si aad u ogaato, waxa aad siin kartaa ilmahaaga agabka uu wax ku qorayo ama sawiradayo iyo warqad oo waxa aad tidhaahdaa, "Sawir sawir__." Sidee ayuu u qabsadaa qalin beensalka?
<b>8a Fahanka luuqada</b>	Ilmahaagu ma awooda inuu ku jawaabo kalmadaha gaarka ah iyo bayaanada gudud, su'aalaha iyo sheekooyinka? Tusaale ahaan, ilmahaagu waxa uu ka warami karaa muuqaalka sawirka uu jecel yahay marka la waydiyo.
<b>8b Raacitaanka tilmaamaha</b>	Ilmahaagu ma awooda inuu raaco tilmaamaha laba ama wax ka badan oo talaabooyin ah kuwaas oo la xidhiidha ujeedada qoysaska iyo khibradooda? Tusaale ahaan, ilmahaagu waxa uu awooda inuu farxasho oo uu gacmihiisa qalajiyo, kadib marka la xasuusiyoo gacmaha inuu farxasho.
<b>9b Si cad u hadalka</b>	Ilmahaagu ma awooda inuu u hadlo si ay fahmi karaan badanaa dadka yaqaanaa iyo mararka qaar dadka guriga soo booqanayaayi? Ilmahaagu waxa uu isticmaalaa kalmada si sax ah badanaa. Tusaale ahaan, ilmahaagu waxa uu odhan karaa, "waxa aan arkay qudhaanko jiriqaa".
<b>10a Wada shaqaynta badalka</b>	Sidee ilmahaagu u wadi karaa sheekada ugu yaraana sadex su'aaloo iyo jawaabood dadka isku waydaarsan karaan? Tusaale ahaan, waxa ay ka sheekeysan karaan wixii isku midka ah: Ilmaha: "Waxa aan doonaya in aan qabto beerta nashada. Adiga: "Markaa kadib ayay u wada qado tegi karnaan." Ilmaha: "Waxay kori karnaam meesha laga soo siibto marka aynu joogno halkaa sow maaha?" Adiga: "Dabcan, hadii ayna qoyanayn oo ayna roob ahayn." Ilmaha: "Waxa aan rajaynayaa in Max inuu joogo beerta nasashada, sidoo kale." Adiga: "Waxaan u malaynayaa in Max uu la maqan yahay qoyskiisa. Ilmaha: "Oh. Waxaa dhici kartaa markaa inuu Julie joogo."
<b>11a Tegitaanka iyo wada shaaynta</b>	Marka uu ilmahaagu ciyaarayo ama cid kala shaqaynayo shaqo, miyaad kormeertaa sida ilmuu ugu noqnonayo ciyaarta si fudud marka la jeediyo? Tusaale ahaan, marka uu cod jeediyo, ilmahaaga waxa uu awooda inuu sii wado dhismaha. Ilmahaagu ma awooda inaad qorsheeyo oo uu dhiso shaqo la ogaaday inay caqabad leedahay? Tusaale ahaan, ilmahaagu waxa uu doortay inuu ku ciyaaro caruuusad kaliya maalmo badan. Iminka waxaad arkaysaa ilmahaaga oo baadhaya waxa uu doonayo iyo/ama shaqooyin murugsan.
<b>11b Joogtayn</b>	Ilmahaagu siduu u bilaabaa inuu ka fikiro hawlaha oo uu iskugu dayaa inuu hawlaha ku adag isaga? Tusaale ahaan, waxa uu baadhaa xarfadaha birlabta ah talaagada ku dhagaha si uu u ogaado higaada magiciisa.
<b>11c Xalinta mushkilada</b>	Marka ilmahaagu uu qabo mushkilad, sidee ayuu ku helaan xalka? Tusaale ahaan, waxa uu ka shaqeeyaa ciyaarta xujada isaga oo dooranaya midhadhka is galaya si uu iskugu dayo midhadha oo uu u arko inay shaqaynayso. Tusaale ahaan, qorshaynta dhismaha shay aan shaqaynaynin marka kowaad, laakiin in lagu helo xalka oo laga barto khaladka.
<b>12a Aqoonsiga iyo xasuusashada</b>	Ilmahaagu ma bilaabay inuu xasuusto oo uu magacaabo hal ama wax ka badan oo shayo ah oo markaa laga saaray ciyaarta inuu yahay "Wax maqan?" oo ma awooda inuu xasuusno oo uu sheego wax badan?
<b>Isticmaalka xirfadaha kala qaybinta</b>	Ilmahaagu ma awooda inuu koox isku raaciyo wixii isku mid ah (sida cabirkka, midabka, ama qaabka)? Tusaale ahaan, ilmahaagu ma awooda inuu wixii buluug ah is raaciyo. Ilmahaagu ma awooda inuu kala saaro laba shay ama wax ka badan oo isku mid ah, sida cabirkka iyo qaabka ama cabirkka iyo midabka? Tusaale ahaan, ilmahaagu ma kala saari karaa dhamaan badhanada yaryar iyo kuwa waawayn oo makala saari karaa badhanada yaryar iyo kuwa cad.
<b>Ka fikirka calaamadaha</b>	Ilmahaagu ma bilaabay inuu qorsheeyo oo uu isticmaalo sawiro, dhisme, dhaqaaq, iyo bandhig matalaya fikirada? Tusaale ahaan, ilmahaagu waxa uu odhan karaa, "Aynu bal matalno in siidhku baxayo sida ka buuga ku yaala oo kale."

<b>Wargelinta iyo qaab dhaca kala soocitaanka</b>	Ilmahaadu ma awoodaa inuu garto codadka xarfaha iyo qaab dhaca codadka, mararka qaar ka sawiran karaa kalmada sida qaab dhaca "fadhiga" wata "saliga, qadiifada, sijaayada"?
<b>Ogaanshaha iyo kala saaritaanka qaybaha yaryar</b>	Sidee ayuu ilmahaagu bilaabay inuu u fahmo in kalmada ay ka samaysan yihin dhawaqyo kala duwan? Si aad u ogaato: Waxaad tidhaahdaa, "Aynu ciyaarno ciyaar sacbin ah. Waxaynu sacbin doonaa si wada jirka ah magacyadeena." Sacbi dhawaqa magacyadooda sida ku qoran. Waxa aad isku daydaa inaad isku darto lix magac. Imisa magac ayaa awoodaa inaad sacbiso dhawaqooda?
<b>Waxa aad sheegtaan xarfaha magacyada</b>	Ilmahaagu ma awoodaa inuu garto dhawr xaraf oo magiciisa ah? Miyuu awoodaa inuu garto ilaa 10 xaraf, gaar ahaan xarfaha magiciisa? Miyuu awoodaa inuu garto wax badan? Imisa midh?
<b>Isticmaalka dhawaqa xarfaha</b>	Ilmahaagu ma garan karaa dhawaqa kalmado gaagaaban, sida hal sacab oo dhawaq kasta ah oo magaca ah "Tri-na"?
<b>Isticmaalka nuxurka daabacan</b>	Ilmahaagu ma fahsansan yahay inuu qoraalka leeyahay macne? Ilmahaagu ma baadhi karaa kalmadaha isaga oo adeegsanaya faritiisa inta uu dul wado boga bidix ilaa midig?
<b>Isticmaalka xirfadaha akhriska soo socda</b>	Ilmahaagu ma awoodaa inuu matalo akhriska sawirka soo socda iyo talaabada ficolka iyo inuu sheego shay kalmado qoraalka ku jirta, marka loo sheego?
<b>Qor magaca</b>	Ilmahaagu ma awoodaa inuu qoro kalmadaha saxda ah iyo si aan caadi ahayn? Ilmahaagu waxa uu qori karaa magiciisa, laakiin waxa uu u higaadiyaan qaab kale oo aan sax ahayn.
<b>Tirinta</b>	Ilmahaagu ma awoodaa inuu tiriyo ilaa 20, iyo inuu tiri 10-20 shay si sax ah si uu u garto inta shay ee ay yihin? Ilmahaagu ma sheegi karaa tirada ku xigta lambarka marka uu tiriyo lambarada siday u kala horeeyaan 1 ilaa 10? Ilmahaagu ma bilaabay inuu kala saaro oo uu isku daro shan shay, sharaxa qaybaha, iyo aqoonsiga ilaa shan shay oo isku mid ah. Tusaale ahaan, "waxa aan hayaa shan qaybood, 3 buluug ah iyo 2 casaan ah"? Tusaale ahaan, marka ilmahaagu wada akhrinayo buuga, ilmahaagu tusaale ahaan, "Waxaa weeye 3, oo waxaa jira sadex qaybood oo bogan ah."
<b>Tirada</b>	Marka aad ka caawiso, sidee ayuu ilmahaagu ku samayn karaa 6-10 shay oo uu ugaga warami karaa kooxda isaga oo adeegsanaya kalmado sida badan, ama isku mid (is le'eg)? Tusaale ahaan , waxa uu <i>tuuri</i> karaa 10 jeer shirabaadka oo waxa uu ka dul doobo karaa dhulka. Marka sadex ku dhacaan banaanka, waxa uu odhanayaa, "In badan ayaa gudaha geley." Marka aad ka caawiso, sidee ayuu ilmahaagu iskula tirin karaa ama ugu tirin karaan (isaga oo ku daraya tirada hore ee uu tiriay) si loo ogaado inta midh? Si loo ogaado: Abuurista kaadhka dhibcaha ah, kaas oo mid yahay 1-10. Waxa aad ka dalbataa inuu doorto kaadhka oo uu tiriyo dhibcaha. Waxa aad doorataa kaadh kale oo waxa aad tidhaahdaa, "waxa aan is waydiiyay inta dhibcood ee aynu hayno gebi ahaanba. Waxa aanu ognahay in kaadhkaagu leeyahay afar dhibcood. Halka aad ka tirin lahayn mar kale, waxa aan isku dayadaa inaan ku daro dhibcahayga kuwaasa aniga oo ka bilaabaya afar. Afar, shan, lix, todoba. Waxa aanu haysanaa todoba dhibcood marka la isku daro. Iminka kolba midkiin ayaa samaynaya."

<b>Xidhiidhi tirada iyo lambaradooda</b>	Lambarkee ayuu ilmahaagu garanayaan iyo magiciisa? Sidee ayuu ilmahaagu u xidhiidhin karaa tirada si uu u dejisto shayo uu tirsanayo? Si loo ogado: Ku qor tirada ilaa 10 kaadhka macluumaadka ama waraaqo yaryar. Wuxuu aad saartaa miiska si nasiib ah oo waxa aad u sheegtaa inuu qabsado lambar <i>uu</i> garanayo oo uu kadibna kuu sheego. Kadib, waxa aad tustaa shayada yaryar ee aad uruuriseen (sida, kaadhka, badhanka, ama qaybaha). Dheh, "Iminka, marka aad soo saarto kaadhka, waxa aad ii sheegi karaa waxa uu yahay lambarku oo kadibna tiri inta midh ee uu yahay [badhanka] ee la socda."
<b>Fahanka qaababka</b>	Ilmahaagu ma garan karaa oo ma sheegi karaa qaab laba dhinac leh? Tusaale ahaan, waxa uu odhanayaan, "Kani waxaa weeye sadex geesood maadaama oo uu sadex cidhif leeyahay." Waxa uu bilaabay inuu garto oo uu sharaxo sadex geesoodka qaabka ah, sida, "Kani waxaa weeye kubad maadaama oo ay is qalabaa gediso."